

Dugsiyada Magaalada Westerville

SHURUUDAH

DIIWAAN GELINTA

ILMAHAAGA



Talaabada 1aad: Soo ururi dhammaan **dukumeentiyada** loo baahan yahay:

1. Shahaadada Dhalashada ee Asalka ah;
2. Aqoonsiga sawirka ee waalidka/masuulka sharciga ah;
3. Laba (2) cadaymo oo muujinaya deganaansho*;
4. Diiwaanada tallaalka ee la cusboonaysiiyay*;
5. Dukumeentiyada Asalka ah ee Maxkamada Shaabadaysan ee Furriinka/Haynta (haddii ay xaaladaada khusayso)*
6. Natijjooyinkabaaritaanka ee ah inuusan qabin Qaaxada (haddii ilmahaagu ku dhashay meel ka baxsan Mareykanka)

* Ka fiiri sharraxaadda ku qoran dhabarka dambe

Talaabada 2aad: Buuxi codsiga diiwaangelinta onlaynka ah oo kujiraan **ciwaanka iimaylka ee hadda shaqeeya ee qofka mas'uulka sharciga ah.**

Dukumeentiyada loo baahan yahay ee codsiga waxaa si toos ah loogu xarayn karaa qaab onlayn ah AMA waxaad awoodaa inaad iimaylahaan ugu dirto Takhasuslaha Diiwaangelinta kaas oo kula soo xidhiidhi doona si uu u dhamaystiro diiwaangelinta ilmahaaga (carruurtaada).

Talaabada 3aad: Dhammaadka codsigaaga onlaynka ah, fadlan xulo **Taariikhda Dib u eegista Codsga** ee canug kasta oo aad diiwaangelinayso. Tani waxay kuu sahlaysaa in codsigaaga lagu meeleyyo mid ka mid ah takhasus layasheena Diiwaangelinta kuwaas oo kaala soo xidhiidhi doona iimaylka aad ku qortay codsigaaga.

Marka aad ballansato Taariikhda Dib-u-eegista Codsgaaga, fadlan ha beddelin, maadaama ay taasi dib u dhigayso hab-socodka diiwaangelintaada.

Codsigaaga waa in lagu buuxiyaa 30 maalmood gudahood si looga fogaado in la tirtiro hawl-la'aan darteed.

SHARAXA DOKUMENTIGA LOO BAAHAN YAHAY (waxyaabaga #3, #4, & #5)

#3: LABO (2) CADAYMO OO MUUJINAYO DEEGAANKA;

Bixi hal (1) caddayn oo ka socoto **A** iyo hal (1) caddayn oo ka socoto **B**:

A:

- Heshiiska Kiro bixinta/Kirada **cusub** ee lagu baxshay magaca waalidka masuulka ah ; **AMA**
- Bayanka Daynta Guri Godashada (ku taariikhaysan 30-kii maalmood ee la soo dhaafay) ee **cusub** oo uu ku qoran yahay magaca waalidka ilmaha haya;

IYO


B:

- Biilasha Dawlada ee Guriga ee ugu **dambeeyay**, oo muujinaya ciwaanka gudaha Westerville School District iyo magaca waalidka/masuulka sharciga ah (sida Gaaska, Biyaha, Korontada, Diishka/TV, ama Intarneetka).

#4: SHURUUDAHА & MACLUUMAADKA TALLAALKА

Waa in uu bixiyaa diiwaanada tallaalka ee la cusboonaysiiyay (laga yaabaa in ay noqoto daabacaad ka timid Xafiiska Dhakhtarka). Xeerka Ohio ee Dib loo eegay waxa uu u baahan yahay in caddaynta tallaallada lagu xereeyo 14ka maalmood ee ugu horreeya dugsiga, ama ilmaha waa laga saarayaa imaanshaha dugsiga.

#5 – DOKUMIINTIYADA FURIINKA/HAYNTA (haddii ay tani khusayso xaaladaada) – **waa in** maxkamadda saxiixday oo taariikhaysay/waqtiga ku shaabadaysay:



Fadlan kala xiriir Xarunta Diiwaangelinta
614-797-7700

Ama, iskaan ka qaad koodhkan QR-ka si aad u hesho sharraxaad Fiidiyowga ah ee habka diiwaangelinta:

